HERITAGE
INSTITUTE

DOORASHOOYINKA GOLAHA DEEGAANKA PUNTLAND

U GUURISTA HESHIIS BULSHO



December 2022

Tusmada

1. Nuxurka Daraasadda 4
2. Hordhac 5
3. Habraaca Daraasadda 7
4. Jidka doorashada deegaanka 7
5. Doorashada Tijaabada ah 10
6. Farxaddii maalinta doorashada 12
7. Maamul-daadejinta 13
8. Dib-u-heshiisiinta 15
9. Lid isku ahaanta rejooyinka sare iyo xaqiiqada dhaqaalaha 18
10. Gunaanadka 20
11. Talabixinno siyaasadeed 21

Daraasaddan waxa qoray Cabdirisaaq Aadan Muxumed

Xuquuqda daabacaaddan © 2022 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

© Heritage Institute 2022.

1. Nuxurka Daraasadda

Doorashadii golaha deegaanka Puntland oo dhacday Oktoobar 2021, ayaa ahayd tijaabo guulaysatay marka loo eego dimuqraadiyadda iyo maamul-daadajinta heerka dowlad goboleedka. Doorashadan oo ay garwadeen ka ahaayeen hogaamiyayaal siyaasadeed oo kala dambeeyay, siyaasiyiinta dowlad goboleedka curadka u ah faderaalka Soomaaliya iyo daneeyayaal siyaasadeed oo badan, ayaa ku soo dhammaatay guul sida uu sheegay mid ka mid ah goobjoogayaashii dooraashadu.

Doorashadan oo ahayd qof iyo cod ayaa ka dhacday degmooyinka Qardho, Ayl iyo Ufayn- iyada oo lagaga soo guuray 25 sano oo ay hoggaamiye-dhaqameedku qabanayeen doorashooyin dadban, halkaas oo ay ka soo xuli jireen 66-ka xubnood ee golaha deegaanka. Haddaba doorashadan ayaa loo arkayay doorasho xor iyo xalaal ah oo lagaga soo kabanayo daalkii musuqmaasuqa xukuumadihii hore iyo afduubkii nidaamka doorashada. Sida uu sheegay nin raysalwasaare ahaa, doorashooyinka dimuqraaddiga ahi waa, "jidka kaliya ee ay Puntland kaga gudbi karto fadhiidnimada siyaasadda".[1]

Si kastaba ha ahaatee, mucaaradka ayaa shaki ka muujiyay sida ay suuragal u tahay is waafajinta go'aanka Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni ku rabo dowlad dimuqraaddi ah iyo doorasho qof iyo cod ah; oo heer baarlamaan iyo heer madaxweyne ah, iyada oo muddo-xileedkiisu ku egyahay bisha Jannaayo 2024-ka. Waxa ay sheegeen in xukuumadda Deni musuqmaasuqday doorashadii dadbanayd ee 2022, waxaanay su'aal galiyeen in uu golaha deegaanka Puntland oo dhan ka qaban karo doorasho toos ah.

Udub-dhaxaadka ruuxda siyaasadda Puntland ayaa ahayd u ololaynta faderaalnimada iyo awood-qabsiga. Si kastaba ha ahaatee, kuwa ka soo horjeeda federaalka iyo kuwa taageersaniba waxa ay isku raacsan yihiin in aan awoodda laga soo daadajin oo kaliya heer federaalka, kadibna aan lagu soo koobin magaalooyinka waaweyn ee maamul-goboleedda, iyada oo xukunka lagu ururinayo caasimad-goboleedyo been abuur ah. Haddii ay Puntland ku guuldarraysato maamul-daadajinta doorashooyinka heer gobol; waxa dhicisoobaya ruuxda faderaalnimada, "taas oo Puntland ka dhigaysa maamul aan ixtiraamin xeerarkiisa".[2] Dimuqraaddiyadda ka bilaabanta doorashooyinka heer dagmo ayaa tijaabo u noqonaysa maamul-daadajinta xukuumadda labada qayboodba- nidaamka faderaalka iyo in Puntland ka guurto doorashooyinkii hoggaamiye-dhaqameedku cumaamadda u sitay, oo ay degto heshiis bulsho, kaas oo ay muwaadiniintu jaangoynayaan qorshaha siyaasadda.

1. HIPS interview, 2022
2. HIPS interview, 2022.

Sida qaybaha kale ee Soomaaliya, waxa Puntland "ku soo batay hoggaamiye-dhaqameedda".[3] Qabiil waliba dhowr jifo ayuu u sii qaybsamaa. Beelo badan ayaa door weyn ku leh siyaasadda bulshada, siyaasiyiintuna waxa ay isugu xiran yihiin dano qofeed oo gaar ah. Mid ka mida dadkii la waraystay, ayaa yiri, "waxa soo baxay dad badan oo isku sheegaya hoggaamiye dhaqameed, isla markaana canbaaraynaya hoggaamiye-dhaqameedkii ka horreeyay. Qaar ka mid ah cid baa ka danbaysa, halka ay kuwo kala na iskood isu cumaamadeen."

Cilmibaaristu waxa ay sheegaysaa in aan labadan hoggaamiye-dhaqameed (Isimood) midkoodna kaalin ku sii yeelan doonin siyaasadda maanta. Mid ka mid ah kormeerayaashii siyaasadda ayaa doorashooyinka dimuqraaddiga ah ku sheegay "waxa kaliya ee la isku waafaqayo" maadaama dadweynuhu soo dooranayaan wakiilladooda, lagana gudbayo xilli ay dawladnimadu ahayd heshiis xiran oo u dhexeeya odayaasha beelaha iyo hormuudka siyaasadda.

Inkasta oo ay doorashooyinka xorta iyo xalaasha ahi bulshada ka dawaynayaan xanuunnada ay ka midka yihiin qabyaaladda iyo qaraabo-kiilku, haddana waxa jira tabashooyin ku salaysan in doorashada dimuqraaddiga ahi horseedayso dhibaatooyin hor leh oo ay ka mid yihiin in ay kor u qaaddo rajada ay muwaaddiniintu ka qabaan wakiilladii ay soo doorteen in ay oofiyaan ballan-qaadkii ay ku ololeeyeen. Haddii la wiiqo rajada codbixiyayaasha, waxa dhicisoobaya tijaabada dimuqraaddiyadda Puntland. Haba yaraadee, itixaanka ugu weyni waxa uu noqonayaa buuxinta filashooyinka dadweynaha. Waxa se hubaal ah in ay si weyn u kobcayso siyaasadda u adeegta danaha dadweynaha. Haddaba, caqabadda ugu weyn ee hortaagan tijaabada doorashada iyo geeddi-socodka dimuqraadiyaynta Puntland; ayaa ah in la is waafajiyo rajada dadweynuhu ka qabaan doorashooyinka iyo xaqiiqada dhaqaale ee jirta.

2. Hordhac

Burburkii dowladdii kalitaliska ahayd ee 1991 Iyo dagaallada sokeeye ee isdabajoogga noqday ayaa hoggaamiye-dhaqameedka fursad u siiyay in ay noqdaan, "udub-dhaxaadka nabadgalyada iyo xasilloonida siyaasadda Soomaaliya,"[4] waa sida ay sheegeen Gundel iyo Cumar. Puntland oo ah maamul-goboleed ku yaalla waqooyi-bari Soomaaliya, ayaa la aasaaay 1998, waxaanay saldhig nabadeed u noqotay dal ay ka hanaqaadday siyaasad ku dhisan isqabqabsi iyo xifaaltan awoodeed; oo u dhaxeeya haldoorka siyaasadda Soomaaliya.

3. HIPS interview, 2022.
4. Gundel, J. and Omar, A. (2006). The predicament of *Oday* file:///Users/hertage/Downloads/The_Predicament_of_the_Oday_The_role_of%20(1).pdf

Hoggaamiye-dhaqameedka ayaa lafdhabar u ahaa siyaasadda Puntland 25-kii sano ee la soo dhaafay. Odayaashu kumay ekayn oo kaliya qabqable-dagaal, balse waxa ay u shaqaynayeen sida guddi doorasho; waxaanay samaysteen xarumo ay haldoorka siyaasadda gobolku u raadsadaan aqoonsiga siyaasadda. Waxa kale oo ay musdanbeed u noqdeen xallinta khilaafyada qabiillada iyo qalalaasaha siyaasadda, iyaga oo ilaalinaya waxa uu David King Leonard ugu yeeray, " kaladanbayn fowdaysan markasta".[5]

Waxa kaliya ee ay Puntland kaga duwan tahay koofurta iyo bartamaha Soomaaliya ayaa ah heshiiskii loo dhamma ee 1998, heshiiskaas oo ay siyaasiyiinta iyo odayaasha gobolku ku aasaaseen maamul ay ku midoobeen jabhado iyo kooxo hubaysani. Axdi-qarameedkii 1998, oo lagu dhagaxdhigay aasaaska siyaasadda Puntland, waxa uu qodobkiisa 31.1 sheegayaa in "dhammaan xisbiyadii hore u jiray oo ay ka mid ahaayeen Somali Salvation Democratic Front (SSDF), United Somali Party (USP) iyo Somali National Democratic Union (SNDU) la baabiiyay, isla markaana wixii ay maammullo dadweyne hayeen lagu wareejiyay dowladda cusub ee Puntland.[6]

Waxa uu qodobku intaas ku sii daray, in aan "xilligan kumeelgaarka ah xisbiyo cusub la samaysan karin illaa inta laga hirgalinayo dastuur lagu maamulayo."[7]

Sidaa daraaddeed, axdigani waxa uu awoodda siyaasadeed ku wareejiyey Isimada beelaha, isaga oo awood buuxda u siiyey in ay soo xulaan wakiillada beelaha ku metalaya siyaasadda. Habkan ayaa lagu dhisay sharciga, iyada oo ay ka maqan yihiin beelo iyo kooxo bulshada ka mid ahi, maadaama oo aanay muwaadiniintu dooran karaynin wakiilladooda baarlamaanka iyo golayaasha deegaanka. Awoodda-isbahaysiga iyo heshiiska ehelnimada oo ay odayaashu lafdhabar u yihiin, ayaa beddelay codka iyo codayntii dadweynaha. Maamulka waxa laga dhaxaysiiyay odayaasha iyo siyaasiyiinta.[8] Sidaa darteed, Soomaalida kale indhaha uun bay kala socdeen geeddi-socodka siyaasadda Puntland.

Xilligii xaalmastuurka odayadu hadda waa uu dhammaaday, maadaama oo uu ahaa xal ku kumeelgaar ah, loona arkayay jid lagu baxnaanin karo doorasho qof iyo cod ah. Axdiga aasaaska Puntland, qodobkiisa 18.1 waxa uu sheegayaa "in maamul-daadajinta Puntland noqonayso illaa heer degmo, si loo dhiirrigalinayo is-maamulka".[9]

5. Leonard, D (2009). Recreating Political Order: The Somali systems Today. Institute of Development Studies.
6. See the 1998 charter.
7. See the 1998 charter. 8. HIPS interview, 2022.
9. See the 1998 charter.

Axdigani waxa uu dhalay dastuurkii 2012-kii- xilligii xukuumaddii Cabdiraxmaan Faroole, oo ahaa madaxweynihii afraad ee Puntland. Laakin dastuurku ma jidayn dowlad uu shacabku soo dooranayo, mana dhimin awoodda ay Isimadu ku leeyihiin doorashada baarlamaanka. Mid ka mid ah dadkii la waraystay ayaa yidhi, arrintani waxa ay abuurtay in Isimadu door joogto ah ku yeeshaan haykalka dowladnimada. Dhanka kale, hormuudka siyaasadda ayaa u muuqda kuwo aan doonayn in ay carqaladeeyaan xaaladda jirta, islamarkaana aan rabin in ay ka jawaabaan baahida shacabka ee ah nidaam doorasho oo qof iyo cod ah, kaas oo haykalka dowladnimada ka leexinaya jidka odayaasha dhaqanka, kana dhigaya heshiis bulsho oo u dhaxeeya siyaasiyiinta iyo muwaadiniinta Puntland.

Taa lidkeeda, doorashada golaha deegaanka ayaa loo arkaa mid tijaabo u noqon karta in laga gudbo ururinta odayaasha dhaqanka, loona gudbo heshiis bulsho oo dhexmara siyaasiyiinta iyo shacabka Puntland.

3. Habraaca Daraasadda

Cilmibaareyaashii sahankani waxa ay xog ururinta u isticmaaleen habka tibixyaalaha (quanlitative method), waxaanay waraysi ka qaadeen xog-ogaal kala jooga Garoowe, Ufayn, Qardho iyo Eyl. Warbixiyeennadu waxa ay ka koobnaayeen wasiirro hore iyo wasiirrada hadda ee gobolka, maayirro, xubno ka tirsan golayaasha deegaanka Eyl, Ufayn iyo Qardho iyo sida oo kale xubno ka tirsan komishinkii Puntland ee kumeelgaarka ahaa iyo hoggaamiyeyaasha bulshada rayidka ah. Waxa kale oo daraasaddan looga faa'iidaystay in cilmibaarayaasha Heritage goobjoog ka noqdaan goobihii doorashadu ka dhacaysay, maalintii doorashada 25 October 2021. Ugu danbayn, xogta waa la qoray, la isku dubbariday, waana la falanqeeyay.

4. Jidka doorashada deegaanka

Geeddi-socodka dumuqraadiyaddu waxa uu la filyahay ismaamulka Puntland, laakiin waxa uu raad-dhaqaajisay xilligii madaxweyne Maxamed Muuse Xirsi (Cadde-muuse) oo la doortay 2005. Cadde-muuse waxa uu magacaabay guddidii kowaad ee dibu-eegista dastuurka puntland. Guddida ayaa markiiba bilowday geeddi-socodka dibu-eegista dastuurka, iyada oo la kaashanaysa ururrada bulshada rayidka ah iyo ururrada kala duwan ee aan dowliga ahayn, balse waxa loo kala daadiyay si cudur daar la'aan ah.[10] Inkasta oo uu hannaankaasi guuldarraysatay, haddana waxa uu Puntland ku riday jidka dimuqraaddiyadda, waxaana uu galiyay damaca u kala guurka dowlad ku dhisan xaalmastuur oday-dhaqameed hoggaamiyo iyo dowlad ku dhisan heshiis bulsho.

---

10. Puntland's political transition: Taking the first steps toward democratic elections. https://www.interpeace.org/wp-content/uploads/2015/11/2015_06_01_Puntlands_Political_Transformation.pdf

Madaxweyne Faroole, oo ku xigay Cadde-muuse ayaa soo nooleeyay dibu-eegista dastuurka, kaas oo la hirgaliyay 2012, ka dib markii 480 ergay uga codeeyeen 472 ergay.[11] Dastuurka cusub waxa daba socday dhalashada nidaamka xisbiyada badan. Lix xisbi siyaasadeed ayaa la diiwaangaliyay, waxaana la aasaasay Komishinka Doorashooyinka Kumeelgaadhka ah ee Puntland. Waxa kale oo ay dowladdu ansaxisay xeerka doorashada golaha deegaanka, xeerka xisbiyada siyaasadda, xeerka komishinka doorashooyinka iyo xeerka diiwaangalinta codbixiyayaasha.[12]

In kasta oo uu Faroole dardargeliyey isbeddel dimuqraadi ah; sida doorashooyinka dowladaha hoose oo la qorsheeyay 2013, balse muddo kordhin hal sano ahayd oo uu samaystay ayaa abuurtay qalalaase siyaasadeed oo hor leh iyo dibudhac ku yimi geeddi-socodka dimuqraaddiyadda. Faroole waxa uu muddo-kororsigiisa ku sababeey in uu qayb ka yahay geeddi-socodka dimuqraaddiyadda. Si kastaba ha ahaatee, xog-ogaalkii wargaleenka ahaa ayaa sheegay in muddo-kororsigu abuuray kalsooni darro iyo mucaarad ka dhan ah siyaasadda dowladda. Doorashadii golaha deegaanka waa la laalay, ka dib markii ay xisbiyada siyaasaddu ku hanjabeen in ay qaaddacayaan doorashada.[13]

Faroole ayaa markii uu kursiga ka sii dagayay qabtay doorasho bilaa diiwaangalin ah, oo aan la wada gaarsiinin xuduudaha gobolka, waxaana loo turjuntay musuqmaasuq siyaasadeed; shakigana waxaa sii huriyay Faroole oo mar labaad isu soo taagay musharrax madaxweyne. Eeddii xisbiyada mucaaradka, waxa ay dowladdu kaga jawaabtay eedaymo ay ku dhaleecaysay "argagixiso ku soo dhuumanaya doorashada golaha deegaanka, loona soo abaabulay in ay burburiyaan qaddiyadda midnimada iyo xasiloonida Puntland.[14]

Aragtida David Van Raybrouck oo sheegaysa in dimoqraadiyaddu " si aan maangal ahayn isugu lammaanayso rabitaan iyo kalsooni darro" ayaa Puntland sifaynaysa. Sida uu sheegay Raybrouck, "qofkastaa waxa uu u muuqdaa mid doonaya" 'dimuqraaddiyadda, balse "midna ma rumaysna."[15] Muwaadiniinta Puntland waxa ay muujinayaan kalgacal dimuqraaddiyadeed balse taa lidkeeda qaar ka mid ah siyaasiyiinta ayaa ka dayriyay oo ka digaya doorasho qof iyo cod ah.

11. Puntland Political Transformation: Taking the first steps towards democratisation. https://www.interpeace.org/wp-content/uploads/2015/11/2015_06_01_Puntlands_Political_Transformation.pdf
12. Press Release: Puntland government suspends local council elections. https://wardheernews.com/press-release-puntland-government-suspends-local-council-elections/
13. SIDRA, (2016). Democracy in Puntland: The people's choice.
14. Press release: Puntland government suspends local council elections. https://wardheernews.com/press-release-puntland-government-suspends-local-council-elections/
15. Raybrouck, D. (2016). Against Elections: The case for democracy.

Xilligii Cabdiweli Cali (Gaas), oo Faroole ku xigay, ayuu mar kale sii wiiqmay kalgacalkii ay bulshada iyo qaybo ka mid ah siyaasiyiintu u qabeen dimuqraadiyeynta Puntland.[16]

Nidaam-dhaqameedkeedii soo jiraanka ahaa ayay Puntland u isticmaashay doorashooyinkii baarlamaanka iyo madaxweynaha ee 2019, halkaas oo madaxweyne loogu doortay Siciid Cabdullaahi Deni. Deni ayaa sheegay in uu damacsan yahay in la soo dedejiyo doorashada golaha deegaanka, taas oo dib u soo noolaysay guuxa dimuqraadiyadda Puntland. Sida uu sheegay qof ka mid ah shaqaalaha rayidku, qabashada doorasho qof iyo cod ahi waa "shidaal" lagu dhaqaajiyo marka uu istaago mishiinka siyaasaddu, balse Deni ayaa u muuqda mid ka dhabeynaya ballamihii uu ololaha ku galay.[17]

Guddida Doorashooyinka Puntland ee Kumeelgaarka ah (GDPK III) ayuu baarlamaanka Puntland si rasmi ah u ansixiyay bishii Noofembar 2019, waxaanay si degdeg ah u dejiyeen qorshaha doorashada golayaasha deegaanka.[18] Shaqada guddidu waxa ay ahayd: maaraynta iyo qabashada doorashooyinka; diwaangalinta ururrada siyaasadda iyo muwaadiniinta; iyo diiwaangelinta xisbiyada siyaasadda.

Maxamed Cabdiraxmaan (Dhabancad) oo ahaa wasiiru-dowlihii hore ee arrimaha gudaha, federaalka iyo dimuqraadiyeynta, haddana ah wasiirka maaliyadda Puntland, ayaa aamminsan in madaxwaynuhu ku muujiyay go'aankiisa dimuquraadiyadda, in uu isla sannadkii la doortayba bilaabay geeddi-socodka doorashada deegaanka; iyo in aanu xakamayn samaynta xisbiyada siyaasadda iyo in loo sinnaaday khayraadka; iyo waliba in Guddida Doorashooyinka Puntland ee Kumeelgaarka ah loo madaxbannaysiiyay maamulka doorashada; iyada oo aanay soo faragelin madaxweynaha iyo golihiisa fulintu.

Inkasta oo la isku haysto sheegashada wasiirka ee ah in xisbiyada siyaasaddu u si siman yihiin helista kheyraadka, haddana dowladdu waxa ay abuurtay kalsooni ah in Puntland ka gudbi karto hab-dhaqameedka; una gudbi karto dimuqraadiyad casri ah. Haba yaraato'e, dowladda Puntland waxa ay deg-deg ugu dhiirratay in ay kor u qaaddo kalsoonida siyaasadda, halka ay Guddida Doorashooyinka Puntland ee Kumeelgaarka ahi diiwaangelinta xisbiyada siyaasadda iyo wacyigalinta dadweynaha ku kasbadeen kalsoonida dadweynaha iyo sharcinimada doorashada oo ay la socoto heshiis siyaasadeed oo u dhexeeya dhammaan dadka ay khusayso.

16. HIPS interview, 2022.
17. HIPS interview, 2022.
18. 2020 TPEC annual report. https://tpec.pl.so/

Guuleed Saalax Barre, guddoomiyihii hore ee Guddida Doorashooyinka Puntland, ayaa warbixin-sannadeedka 2020-ka ku sheegay in " rabitaanka siyaasadeed fududeyn doono dadaalka guddidu ugu jirto diyaarinta doorashooyinka dowladaha hoose."[19]

Sida oo kale, magacaabista Cabdi Faarax Siciid (Juxa) oo loo magacaabay Wasiirka Arrimaha Gudaha, faderaalka iyo Dimuqraadiyeynta ayaa loo arkay in ay caddeyn dheeri ah u tahay in ay Deni iyo xukuumaddiisa ka go'an tahay qorshaha doorashooyinku.[20] Dad badan ayaa Juxa u arka wasiir dhexdhexaad ah, oo lagu kalsoonaan karo, kartina u leh in uu natiijo ka keeno arrimaha doorashooyinka.

Marka laga hadlayo doorashada tijaabada ah ee golaha deegaanka, Puntland waxa ay si uun u gaartay wax uu Reybrouck ku tilmaamay "isku-dheellitirka daahfurnaanta iyo sharciga".[21] Sida uu qabo Reybrouck, daahfurnaantu waa sida ugu dhakhsaha badan ee ay dowladdi xal ugu hesho dhibteeda; halka sharcinimadu ku xiran tahay heerka taageerada dadweynaha.[22]

5. Doorashada Tijaabada ah

Iyada oo ay weheliso rabitaanka siyaasadeed iyo xamaasadda dadweynuhu, guddida komishinka doorashooyinku waxa ay "shaybaarka doorashada" u xusheen saddex degmo oo kala ah Qardho, Eyl iyo Ufayn, si loo tijaabiyo in Puntland diyaar u tahay doorasho qof iyo cod ah.

Shaybaarka siyaasadda qodobka ugu muhiimsani waa ka go'naanta ah in dowladda laga soo raro qaab-dhaqameedka loona guuro nidaam dastuuri ah oo muwaadiniintu soo xulato cidda ay rabto, inkasta oo aanay dadku ku wada qanacsanayn. Mid ka mid ah xubnaha guddiga doorashada oo warbixintan lagu wareystay ayaa ku dooday in ay jiraan "koox ka mid ah siyaasiyiinta oo ay ka go'an tahay in ay kala dhantaalaan hannaanka doorashada, sababta oo ah waxa ay ahaayeen/yihiinna kuwo ku macaasha soo xulista siyaasadda ku dhisan dhaqanka, oo cabsi ka qaba in ay ku fashilmaan isbeddelka cusub". [23]

19. HIPS interview, 2022.
20. 2021 TPEC annual report. https://tpec.pl.so/
21. HIPS interview, 2022.
22. Raybrouck, D. (2016). Against Elections: The case for democracy. The Bodley Head, London.
23. Raybrouck, D. (2016). Against Elections: The case for democracy. The Bodley Head, London.

Ubax Cabdullaahi Abshir oo ah xoghayaha guud ee guddida doorashooyinka ayaa sheegtay in saddexdan degmo lagu soo xulay in ay matalaan Puntland, laguna soo doortay goobta ay ku yaallaan deegaan ahaan. Waa in midkood ku yaallo dhul xeebeed (Eyl); ta kale na waa caasimadda gobolka (Qardho); tan saddexaadna waa beeralay iyo xoolo dhaqato (Ufayn). In aan xuduudahooda wax muran ahi ka jirin ayaa ahaa shardi kale oo muhiim ah, sida ay Ubax sheegtay.

Doorashada saddexda degmo ayaa ku astaysnayd 25, October, 2021, maalintaas oo bilow u ahayd tijaabadii siyaasadeed ee Puntland, iyo imtixaankii lagaga gudbayay hannaankii doorasho ee soo jireenka ahaa, loona guurayay doorasho dimuqraadi ah, oo qof iyo cod ah. [24]

Tijaabo kale, oo siyaasadeed, ayaa daarnayd qiimaynta kartida, daacadnimada, iyo dhexdhexaadnimada guddiga doorashooyinka kumeelgaarka ah. Waxa ay ahayd in guddida lagu qiimeeyo heerka madaxbannaanida ee ay gobollada la soo xulay kaga qabanayso doorasho xor iyo xalaal ah, taas oo haddii lagu guulaysto la sii gaarsiin karo dhammaan degmooyinka Puntland.

Tijaabo doorasheeddan ayaa guddida komishinka lafteeda u ahayd cashar ay wax ka baarteen, waana markii ugu horraysay ee ay qabtaan doorasho qof iyo cod ah. Sidaas darteed tijaabada saddexda gobol waxa ay ahayd hab lagu qiimaynayo suuragalnimada lagu maamulayo ololayaasha xisbiyada siyaasadda, diiwaangalinta codbixiyayaasha iyo xulashada goobaha codaynta.[25]

Si ay guddidu u xaqiijiso madaxbannaanideeda, una kasbato kalsooni dadweynaha waxa ay xisbi kasta u qoondaysay muddo cayiman oo uu ku qabto isku soo baxyadiisa ololaha- middo 24 maalmood ah.[26] Komishanku waxa uu ganaaxay xisbiyadii jabiyay awaamiirtii doorashada ee lagu heshiiyay. Tusaale ahaan, xisbiga KAAH, oo ah xisbiga talada haya, ayaa maalin aanu u lahayn ololeeyay, waxaana lagu ganaaxay $ 1,000, iyo in ololaha laga joojiyay maamaalin ka mid ah dharaarihii isu soo baxyadiisa.[27]

24. HIPS Interview, 2022.
25. HIPS Interview, 2022.
26. HIPS Interview, 2022.
27. HIPS Interview, 2022.

Guddida Komishinka Doorashooyinka (GKD-III) ayaa kasbaday wada-ogolka siyaasadda iyo kalsoonida dadweynaha. Inkasta oo ay waayo-aragnimo la'aani jirtay, haddana waxa si la yaab leh loogu guulaystay; bixinta kaararka codbixinta oo la siiyey 37,738 codbixiye, waxa la cayimay wakhtiga ololaha xisbiyada siyaasadda, waxaana la qoondeeyay 54 goobood oo laga codeeyo.[28]

Xisbiga talada haya ayaa isna dhankiisa xurmeeyay awaamiirta komishanka, isaga oo wakhti isku mida siiyay dhammaan xisbiyada ku tartamaya doorashada. Xubin ka mid ah bulshada rayidka ah, ayaa tiri, "haddii xisbiga KAAH lid ku noqon lahaa, waxa dhaawacmi lahayd dhexdhexaadnimada iyo sumcadda madaxbannaaninda guddida komishinka".[29]

6. Farxaddii maalinta doorashada

Farxad siyaasadeed ayaa qabsatay Puntland. Waxa isu soo baxay taageerayaasha 10-ka xisbi siyaasadeed ee isu diwaangaliyay[30] in ay u tartamaan codadka saddexda degmo iyo caasimadda Puntland ee Garoowe, kuwaas oo ay ka mid yihiin siyaasiyiin, bulshada rayidka ah iyo xubno ka socday deeq bixiyayaasha. Waxa kale oo isu soo baxay rag iyo dumar iyagu iska caadi ah. Sida uu sheegay xubin golaha deegaanka ka mid ahi, waxa laga yaabaa in aan dadweynaha isu soo baxay "aqoon ku filan u lahayn doorka golayaasha deegaanka ama in ay madaxda xisbiyada su'aalo ka waydiiyaan ajandayaashooda siyaasadeed, laakiin fursadda fudud ee ay codkooda ku dhiibteen, oo ahayd markii ugu horreysay ayaa aad u soo jiidatay."[31] Farxadda siyaasadeed waxaa sii xoojiyey tabinta tooska ah iyo wararka baraha bulshada.

Cilmibaarayaasha Machadka Heritage, oo goobjoogayaal ahaa maalintii doorashadu ka dhacday degmada Eyl, ayaa arkayay safaf dhaadheer oo 5-tii subaxnimo tubnaa bannaanka goobaha codbixinta-waa hal saac ka hor intii aan si rasmi ah loo furin goobaha doorashada. Iyada oo ay aad u yarayd faragelinta saraakiisha amniga, codbixiyayaashu waxa ay taagnaayeen cadceed aad u kulul. Haweenay ilmo yar xanbaarsanayd oo saf kaga jirtay goob codbixineed ku taalla degmada Daawad, ayaa sheegtay in ay diyaar u tahay in ay sugto illaa qorraxdu ka dhacayso. "Waxa aan rabaa in aan ogaado sida ay tahay codbixintu,"[32] ayay tidhi, iyada oo dhabarkeeda ku ruxaysa ilmaha ku ooyaya. Go'aankeeda ku aaddan codbixinta ayaa muujinaya baahida ay muwaaddiniinta Puntland u qabaan in ay ka gudbaan hannaanka soo jireenka ah, oo ay u guuraan doorasho ay madaxdooda ku keenaan heshiis bulsho.

28. See TPEC press release https://tpec.pl.so/press-release/
29. https://tpec.pl.so/
30. HIPS Interview, 2022.
31. TPEC annual report. https://tpec.pl.so/
32. HIPS interview, 2022.

Qurbajoog in badan dalka ka maqnaa oo dhowaan soo laabtay iyo xubin ka tirsan guddida doorashooyinka ayaa tijaabadan ku tilmaamay "guul taariikhi ah, fursad mar la arag ah iyo hadyad Eebbe". "Waxa laga yaabaa in aan danbaabo haddii aan baryada badiyo," ayaa uu yidhi, isaga oo aqoonsiga komishanku qoorta u suran yahay.

Eyl waa degmo cidla ku taalla oo horumarkeedu hooseeyo. farxadda maalinta doorashada waxa rejooyinkeeda ka mid ah in golaha cusub ee deegaanku wax ka qaban doono dayacaaddii hore, oo uu horseedayo horumar dhinaca kaabayaasha dhaqaalaha iyo sal ka soo unkidda dowladnimada ah, ma aha Puntland oo kaliya balse waa Soomaaliya oo dhan. Xubin ka tirsan guddida doorashooyinka, ayaa tiri "karti waa la hayaa; haddii aan rabitaanka siyaasaddu rejada wiiqin." [33]

> *"Hase ahaatee, waxaan doodi ka taagnayn, in uu kor u kacay dareenka iyo hammiga dadweynuhu u qabaan siyaasadda.*

Muddadu haba yaraatee, waxa halxidhaale adag noqon doona ka dhabaynta filashada dadweynaha. Hase ahaatee, waxaan doodi ka taagnayn, in uu kor u kacay dareenka iyo hammiga dadweynuhu u qabaan siyaasadda. Haddaba, caqabadda ugu weyn ee hortaagan tijaabada doorashada iyo geeddi-socodka dimuqraadiyaynta Puntland ayaa ah in la is waafajiyo rejada dadweynuhu ka qabaan doorashooyinka iyo xaqiiqada dhaqaale ee dalka ka jirta.

7. Maamul-daadejinta

Gordon Crawford iyo Christof Hartmann ayaa maamul-daadejinta ku tilmaamay in qayb la "wareejiyo awoodda, masuuliyadda, maaliyadda iyo heerarka cashuuraha dowladda dhexe, ilaa la gaarsiiyo heerka ugu hooseeya dowladda sida gobollada iyo degmooyinka".[34]

Puntland, si la mid ah Soomaaliya inteeda kale, waxa ay u janjeertaa in ay awoodaha dowladda ku soo koobto dowladda dhexe, dhaqankaasina waxa uu salka ku hayaa taariikhdii siyaasadda gumaysiga iyo tii xukuumadihii hore ee Soomaaliya. Awoodda siyaasadda maamulka Puntland ayaa ah mid ku urursan caasimadda Garoowe.[35] Sida uu sheegay mid ka mid ah xog-ogaalkii daraasaddu, haldoorka siyaasadda gobolku kuma dhaqmaan waxa ay sheegayaan, marka loo eego qaybta maamul-daaajinta iyo masuuliyadaha dowladda hoose, taasina waa xaqiiq siyaasadeed oo meesha ka saaraysa in ay Puntland dabada ka riixdo awood qaybsiga iyo maamul-daadajinta dowladda dhexe ee federaalka. Cabdi Faarax (Juxa), Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta, ayaa sheegay in aanay Puntland "sii wadi karin doodda Federaalka, haddii ay ku guul darreysato in ay dowladaha hoose u qabato doorasho qof iyo cod ah, isla markaana qayb ka mida awoodda maamulka u daadajiso dowladaha hoose."[36] Juxa ayaa yiri, Puntland "lama gorgortami karto" dowladda federaalka, inta ay awoodda ku soo koobayso caasimaddeeda.

---

33. HIPS interview, 2022.
34. HIPS interview, 2022.
35. Crawford, G., and Hartmann, C. (2008). Decentralisation in Africa: A pathway out of poverty and conflict. Amsterdam University Press.
36. HIPS interview, 2022.

> *Tallaabooyinka siyaasadda kumeelgaadhka ah ee Garoowe maamulka ugu daadajiyay magaalooyinka Eyl, Ufayn iyo Qardho iyo sida loo buunbuuniyay ayaa ka mid ah natiijooyinkii tijaabada doorashada*

Tallaabooyinka siyaasadda kumeelgaadhka ah ee Garoowe maamulka ugu daadajiyay magaalooyinka Eyl, Ufayn iyo Qardho iyo sida loo buunbuuniyay ayaa ka mid ah natiijooyinkii tijaabada doorashada.

Siyaasiyiintii ololaynaysay iyo madaxda xisbiyada ayaa si aan hakasho lahayn ugu noqnoqonayay saddexda degmo. Qaar baa habeenno ku dhaxay dhulka miyiga ah, iyaga oo u durbaan tumaya xisbiyadooda, sida oo kale siigada baabuurta kolanyada ah ayaa noqotay astaan ka turjumaysa muuqaalka deegaanka degmooyinkan doorashadu ka dhacayso. Tusaale ahaan, Axmed Cilmi Cismaan (Karaash) oo ah madaxweyne ku-xigeenka Puntland, ayaa muddo lix maalmood ah ku sugnaa deegaanka Ufayn, isaga oo shacabka deegaankaas ka dalbanayay in ay codka siiyaan xisbigiisa.

Magaalooyinka Eyl, Ufayn iyo Qardho ayaa hadda laga doortay duqyaal magaalo, waana tallaabo ka mid ah maamul-daadejinta. Axmed Abshir Siciid oo dhowaan loo doortay duqa degmada Ufayn ayaa "qalad ku tilmaamay in wasiirro iyo hoggaamiyeyaal xisbi oo aan waligood deegaanka imani bulshada albaabada ku garaacaan oo cod waydiistaan, iyaga oo ka hadlaya adeegyada bulshada iyo mashaariic horumarineed oo ay ballan ku qaadayaan."[37] Mideeye, oo ka mid ahaa xisbiyadii ugu musharraxiinta cadcaddaa ayaa hoolkii shirarka ee ugu horreeyay ka dhisay Ufayn. Sida oo kale, xisbiyada siyaasadda ayaa laba bas u ii biyay iskuulka Eyl, waxqabadkaas oo ka mid ahaa ololahooda siyaasadeed.

Axmed Abshir Saciid ayaa sheegay, in socdaallada noocan oo kale ah ee ay madaxda dalka ugu sarraysaa ku tagayaan miyiyada fogfog noqon lahaayeen "wax aan la qiyaasi karin haddii aanay ku lammaanayn tijaabada doorashadu."[38] Axmed, waxa uu aamminsan yahay in doorashada qof iyo codka ahi "soo shaacsaartay muhiimadda deegaan ee ay leeyihiin degmooyinkan meelaha fogfog ku yaallaa, taasina sare u qaadday muhiimaddooda siyaasadeed". "Immisa qof ayaa doorashada ka hor yaqaannay Ufayn?" Ayuu Axmed weydiin galiyay.

Xubin ka tirsan golaha deegaanka Qordho ayaa tiri, "doorashada tijaabada ah ayaa saddexda gobolba uga dhacday si ka madaxbannaan faragalinta dowladda iyo Isimada reeraha."[39] "waannu garanaynaa in aannu matalo bulshada, oo aannaan matalin isimada iyo madaxweynaha,"[40] ayuu hadalka sii raaciyay. Mid ka mid ah xog-ogaalkii daraasaddan lagu waraystay ayaa yiri, golahu ma noqon karo "la hayste dabo-dhilif" u ah Isimada reeraha ama xukuumadda iyo madaxweynaha.

37. HIPS interview, 2022.
38. HIPS interview, 2022.
39. HIPS interview, 2022.
40. HIPS interview, 2022.

> *Inkasta oo ay taasi muujinayso dareen maamul-daadajineed iyo qaangaadhnimo siyaasadeed, haddana waxa xaqiiqo ah in golayaashu mar kasta xukuumadda ugu tiirsan yihiin sababo dhaqaale iyo mashaariicda horumarinta, taasina waxa ay horseedi kartaa faragalin iyo musuqmaasuq*

Xisbiyadii bahoobay ee mucaaradka oo ahaa Mideeye, Caddaaladda iyo Sinnaanta, ayaa ku guulaystay golayaasha deegaanka Ufayn iyo Qardho, waxaanay qaateen maayirka iyo maayir-ku-xigeenka degmooyinkaas. Xisbi xaakimka Deni ayaa hal degmo ku guulaystay. Inkasta oo ay taasi muujinayso dareen maamul-daadajineed iyo qaangaadhnimo siyaasadeed, haddana waxa xaqiiqo ah in golayaashu mar kasta xukuumadda ugu tiirsan yihiin sababo dhaqaale iyo mashaariicda horumarinta, taasina waxa ay horseedi kartaa faragalin iyo musuqmaasuq. Laakiin doodda uu qabo mid ka mid ah maayirrada oo ah "in dadku la xisaabtamayo, oo aanay xukuumadda Garoowe la xisaabtamaynin" haddii arrintu ku socoto sida uu hadalka u dhigay, waxa golayaasha deegaanka Eyl, Ufayn iyo Qardho ee la soo doortay faragalinta siyaasadda ka ilaalinaya codka shacabka.

8. Dib-u-heshiisiinta

Sida uu qabo Derek Barker, "dib-u-heshiisiintu waa hawsha ugu mudan siyaasadda."[41] Marka aynnu eegno arrinta Puntland, si la mid ah dalka intiisa kale, ayay hoggaamiye dhaqameedku jaangooyaan aragtiyaha waddaniyadda, haayadaha siyaasadda iyo shuruucda dimuqraaddiyadda.

Inkasta oo Isimada Puntland bilowgii lagu ammaanay doorka ay ka soo qaateen aasaaska gobolka,nabadaynta iyo soo kabashada bulshada; wixii ka danbayeeyay burburkii dowladda dhexe, haddana awooddii ay ku lahaan jireen doorashooyinka dadban waxa ay bulshada ku dhex abuurtay tabashooyin siyaasadeed oo ka yimid in ay sharraxaan cidda ay raallida ka yihiin, cidda aanay ka ahaynna tartanka ka joojiyaan.[42] Sida uu sheegay mid ka mid ah golaha deegaanka Qardho, nidaamkii dhaqanku waxa uu u muuqdaa mid " kaalintiisii siyaasadeed dhacday, oo ay taagan tahay heer bulshadu ka kortay doorkii ay ugu jireen nabadaynta.[43]

Taasi waxa ay tarmisay in ay disho sumcadda Isimada, sababta oo ah waxa loo arkaa ama yihiin ba xuddunta qaraabo-kiilka iyo qabyaaladda. Waxa kale oo jirta in muwaadiniintu habkaas ka jecelin yihiin ku dhaqanka siyaasadda xorta iyo xalaasha ah. Qof xog-ogaal ah ayaa ka sheekeeyay sheeko dhex martay laba musharrax oo uu midkood taageero weyn ka haystay dadka deggan tuulo aad u yar, oo aan ka kale laga aqoon. Waxa ay isula tageen madax-dhaqameed ay qaraabo dhow yihiin- si uu u ansaxiyo kooda u tartamaya golaha deegaanka. Ka dibna oday-dhaqameedki isaga oo aan cidna kala tashan, ayaa uu kaligii go'aan gaaray in uu reebo kii caanka ahaa, isla markaana ansixiyo kii aan deegaanka laga aqoon.

---

41. HIPS interview, 2022.
42. HIPS interview, 2022.
43. Barker, D. (2009). Tragedy and Citizenship: Conflict, Reconciliation, and Democracy from Haemon to Hegel. State University of New York.

Isaga oo aargoosanaya, ayuu musharraxii la reebay caleemo-saaray oday-dhaqameed cusub, kaas oo kicin bulsho iyo loollan siyaasadeed ka dhex abuuray jifooyinkii labada musharrax. Sida oo kale, musharrax siyaasadeed ayaa ku gacan sayray beeshiisa, ka dib markii oday-dhaqameedku si xaq-darro ah ugu diiday in ay u magacaabaan golaha wakiillada. Xildhibaanka ayaa wacad ku maray in aanu ka qayb qaadan doonin arrimaha beesha uu ka soo jeedo illaa oday-dhaqameedkaas la beddelo ama beeshiisu wada cambaarayso, laakiin labadii codsi midna looma fulin, waxaana abuurmay khilaaf bulsho, oday-dhaqameedkiina waxa uu lumiyay kalsoonidii shacabka.

Taas lidkeeda, tijaabadii doorashada Eyl, Qardho iyo Ufayn ayaa jidbixin u noqotay dib-u-heshiisiinta bulshada iyo siyaasadeedda-labadaba. Sidii oo ay taageerayso doodda Barker, oo geeddi-socodka siyaasadda ku sheegtay " masraxiyad bulshada u dhexaysa," ayay doorashadii golaha deegaanku beddeshay xafiiltankii siyaasadeed iyo cabashooyinkii u dhaxeeyay bulshada, beelaha, qaraabada iyo odayaashii qabanayay tartanka sida furan loogu codaynayo. Si ka duwan aragtidii la qabay ee ahayd in doorashooyinku keenayaan kala qaybsan bulsho iyo xasilooni darro siyaasadeed, waxa ay keeneen dibuheshiisiin wanaagsan.

> *"Si ka duwan malo-awaalkii guud ee ahaa in doorashooyinku keenayaan kala fogaan bulsho iyo xasillooni-darro siyaasadeed, dibuheshiisiintu waxa ay noqotay mid ka mid ah natiijooyinkii tognaa ee doorashooyinka saddexda degmo*

Si ka duwan malo-awaalkii guud ee ahaa in doorashooyinku keenayaan kala fogaan bulsho iyo xasillooni-darro siyaasadeed, dibuheshiisiintu waxa ay noqotay mid ka mid ah natiijooyinkii tognaa ee doorashooyinka saddexda degmo.

Xisbiyada siyaasaddu waxa ay noqdeen jid ay musharraxiintu cod ku raadsadaan, iyaga oo musharraxiinta u abuuray fagaare ay bulshada kala falgalaan oo ay ka sheegtaan afkaartooda. Mid ka mid ah xubnaha golaha deegaanka Qardho, ayaa yiri, ma jiro musharrax "magacaabistiisa ka tuugay oday-dhaqameedka". Mid ka mid ah maayir-ku-xigeennada saddexda degmo, oo ku faanaya in uu codad badan ka helay xisbigiisa mucaaridka ah, ayaa ku faallooday in doorashada tooska ahi muwaadiniinta siinayso awood ay kaga maarmaan madax-dhaqameedka. Tusaale ahaan, mid ka mid ah maayarrada cusub ayaa sheegay in uu 15 sano isku dayay in uu u tartamo xubinnimada golaha deegaanka, balse oday-dhaqameedku waligiiba u diiddanaa in uu magacaabo." Inkasta oo aan mucaarad ahay, waligay waxaan u mahadcelin doonaa Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni oo hirgeliyay doorasho qof iyo cod ah, waxaanu ku tallaabsaday guul taariikhi ah oo ay ku fashilmeen madaxdii isaga ka horreysay."[44] Ayuu yidhi. Duqa magaalada, waxa ay dhammaystirka doorashada golaha deegaanka u ahayd "hal abuur muhiim ah" oo loogu talagalay baahinta xukunka iyo dib-u-heshiisiinta bulshada iyo siyaasadda Puntland iyo Soomaaliya oo dhan.

44. HIPS interview, 2022.

> *Ansixinta saammi-qaybsiga matalaadda liiska codadka xiran, oo xisbiga kuraastiisa lagu jaangoynayo tirada codadka uu ka helo doorashada golaha deegaanka ayaa dajisay xiisadda*

> *Saami-qaybsiga matalaadda waxa si toos ah u diiday xisbiga talada haya ee KAAH oo xisbiyada mucaaradka ka badiyeen ka dib markii mucaaridku isku bahaysteen laba ka mid ah saddexda degmo ee Qardho iyo Ufayn, taas oo keentay in xiisadda lagu yareeyo matalaad dheellitiran.*

> *Tusaale ahaan, labo nin oo walaalo ah oo la kala socday laba xisbi siyaasadeed ayaa loo doortay golaha deegaanka degmada Eyl, taas oo aan macquul ahayn xilligii nidaam beeleedka*

Ansixinta saammi-qaybsiga matalaadda liiska codadka xiran, oo xisbiga kuraastiisa lagu jaangoynayo tirada codadka uu ka helo doorashada golaha deegaanka ayaa dajisay xiisadda. Sababta oo ah codbixiyayaashu si shaqsi ah uma kala dooranaynin musharraxiinta, laakiin waxa ay ka dhex dooranayeen xisbiyada siyaasadda. Marka loo eego aragtida John H. Humphrey, saami-qaybsiga matalaaddu ma ogola "natiijo la buunbuuniyey" balse waa hubinta isu dheellitirnaanta matalaadda. Haba yaraatee, xisbi kastaa waxa uu helayaa kuraas, marka loo eego boqollayda codadka uu ku guulaystay. Taas macneheedu waa in xisbiyada yar yar ee mucaaradka ahi fursad u helayaan in ay kuraas ku guulaystaan, iyaga oo xisbiyada waaweyn iyo kuwa taageerada badan u diidaya aqlabiyad buuxda, taas oo dowladda u yeelaysa sifo maamul wadaag.

Saami-qaybsiga matalaadda waxa si toos ah u diiday xisbiga talada haya ee KAAH oo xisbiyada mucaaradka ka badiyeen ka dib markii mucaaridku isku bahaysteen laba ka mid ah saddexda degmo ee Qardho iyo Ufayn, taas oo keentay in xiisadda lagu yareeyo matalaad dheellitiran. Liis xirnaa ayaa sida oo kale xaqiijiyay magacaabista haweenka. Iyaga oo ka faa'iidaysanaya casharradii doorashada Soomaaliland ayay haweenka xubnaha ka ah golayaasha deegaanka saddexda degmo isku raaceen in aanay ka mid noqon doonin golaha deegaanka haddii aaan la siin saami-qaybsi u qoondaysan haweenka.

Marka laga yimaaddo doodda ku salaysan in reer hebelnimadu qaabayso doorashada siyaasadda Soomaalida, tijaabadii doorashada Puntland waxa ay si maangal ah u muujisay in aanay codbixintu u dhigmin nidaamka 4.5. inkasta oo qabiilku ahaa aqoonsi bulsho, haddana ma ahayn qodob go'aamin kara natiijada doorashada, shaqana kumuu lahayn xisbiga uu qofku u codeeyey. Maayirrada cusub ee degmooyinka Qardho, Eyl iyo Ufayn, ayaa sheegay in ay ka walaacsan yihiin mashaariicda horumarineed iyo bixinta adeegyada aasaasiga ah sida biyaha, caafimaadka, waxbarashada, iyo waddooyinka, balse aanay ka warwarsanayn jifooyinka iyo beelaha ay ka soo jeedaan.[45]

Tusaale ahaan, labo nin oo walaalo ah oo la kala socday laba xisbi siyaasadeed ayaa loo doortay golaha deegaanka degmada Eyl, taas oo aan macquul ahayn xilligii nidaam beeleedka. Natiijada kale ee cajiibka ahi waxa ay ahayd in beelaha qaarkood oo markii hore golaha deegaanka ku lahaa hal xubin, ay doorashadii tooska ahayd ku yeeshaan lix xubnood. Mid ka mid ah haweenka golaha deegaanka degmada Qardho ayaa "qiimaha doorashada tooska ah, ku tilmaantay in qof waliba ku biiri karo xisbiga uu rabo, oo ay ku xiran tahay qofka kartidiisa, firfircoonidiisa, fikirkiisa iyo darajada uu ku leeyahay xisbigiisa".[46]

---

45. HIPS interview, 2022.
46. Barker, D. (2009). Tragedy and Citizenship: Conflict, Reconciliation, and Democracy from Haemon to Hegel. State University of New York.

> *Arrinta xiisaha badan, ayaa ah in xisbiyada siyaasadda iyo beelaha helay kuraas ka yar kuwoodii hore aanu midkoodna ka gadoodin natiijada soo baxday ama aanu muujin cabashooyin siyaasadeed.*

Arrinta xiisaha badan, ayaa ah in xisbiyada siyaasadda iyo beelaha helay kuraas ka yar kuwoodii hore aanu midkoodna ka gadoodin natiijada soo baxday ama aanu muujin cabashooyin siyaasadeed. Arrintan ayaa inta badan loo aanaynayaa hufnaantii lagu soo bandhigay goobaha cod bixinta iyo xilligii la codaynayay. Maadaama ay codaynayeen dad badan oo aan waxna qorin waxna akhriyin; guddida doorashooyinku waxa ay u yeeray munaaqibiin matalaya xisbiyada siyaasadda, si ay u caawiyaan dadka aan calaamadsan karin warqadda codaynta, iyaga oo ugu calaamadinaya goob la wada arkayo oo daahfuran. Qaar ka mid ah codbixiyaasha aan waxna qorin waxna akhriyin ayaa fagaarayaasha goobta codbixinta ka sheegayay xisbiyada ay rabaan in ay u codeeyaan, iyaga oo aan ku xulan qabiil ay wadaagaan, taas oo meesha ka saaraysa "khuraafaadka siyaasadda ku dhisan qabiilka" oo la aamminsan yahay in ehelnimadu qaabayso haayadaha siyaasadda Soomaaliya iyo doorashooyinka-labadaba.

Doorasahda tijaabada ah oo si caddaalad ah u dhacday ayaa abuurtay masrax bulshada u dhaxeeya, taas oo u gogolxaadhay dib-u-heshiisiin bulsho iyo mid siyaasadeed, ugu yaraan magaalooyinka Qardho, Eyl iyo Ufayn. Waxa laga yaabaa in ay sidan oo kale u wada gaadho Puntland iyo guud ahaan Soomaaliya. Odayaasha dhaqanka ee la waraystay ayaa caddeeyay in doorashadu ka dulqaadday culayska eedeymihii qabyaaladda ee joogtada ahaa. "Waxaannu ka mid nahay dadka ku faa'iiday doorashada qofka iyo codka ah, sababta oo ah way naga soo dhaceen eedaymaha qabyaaladdu, intaas wax ka bandanna ma sii xammilayno, diyaarna uma nihin kala qaybinta bulshada iyo siyaasad xumada, sida oo kale annaga laftayda waa noo dawo doorashada tooska ahi,"[47] ayuu yidhi oday aannu Ufayn ku waraysannay.

9. Lid isku ahaanta rejooyinka sare iyo xaqiiqada dhaqaalaha

Doorashadii tijaabada ahayd waxa ay abuurtay rejooyin aad u sarreeya. Ballanqaadyadii ololaha iyo hiyikacii siyaasiyiintu abuureen waxa ay kor u qaadeen rejo ah in maamul-daadejintu noqon karto "dariiq lagaga baxo saboolnimada".[48] Sida uu sheegay mid ka mid ah maayirrada cusub, "Shacabka waxa laga dhaadhiciyay in doorashada qof iyo codka ahi keenayso mashaariic horumarineed iyo adeegyo aan hore u jirin.[49]

47. HIPS interview, 2022.
48. HIPS interview, 2022.
49. Humphrey, J. (2019). Proportional Representation: A study in Methods of Election. Good Press.

Sidaa darteed, waxa ay dowladda hoose ku dhibtoon doontaa in ay ka soo baxdo filashada dadweynaha. Tusaale ahaan, Ufayn, waa degmo ka fog caasimadda, waanay adag tahay in si fudud loo gaaraa. Ufayn, xataa hore umay gaarin adeegyada ay iska kaashadaan haayadaha Qaramada Midoobay iyo dowladaha hoose, kuwaas oo ah barnaamijyo "lagu dhiso awoodda dowladda hoose". Inkasta oo ay degmada Eyl leedahay muhiimad taariikhi ah, kuna taallo badweynta Hindiya, haddana ma laha dakhli dhaqaale oo ku filan.

> *"Waxa ay u muuqataa in doorashadii tijaabada ahayd wax ku kordhisay hannaanka maamul-daadajinta, iyada oo dadweynaha siisay fursad ay ku doortaan xubnahooda golaha deegaanka, balse may keenin dakhligii dhaqaale ee laga rejaynayay. Muwaadiniinta codkoodu waa in uu u jaro adeegyada aasaasiga ah*

Miisaaniyadda ay dowladda Puntland u qoondaysay dowladaha hoose ma aha mid ku filan. Markii cilmibaaristan la samaynayay, golayaasha la doortay waxa ay jireen afar bilood, xilligaasna dowladda kamay helin kaalmooyin dhaqaale iyo kuwo agab toonna. Sida oo kale, ma jirin wax mashaariic horumarineed ah oo laga fuliyay deegaannadaas, waxaana xaallada oo markii horaba liidatay uga sii daray abaarta sida xun u naafaysay. Mid ka mid ah maayirrada ayaa yiri, "waxa aannu xukuumadda Garoowe ka sugaynaa in ay ugu yaraan naga caawiso qarashaadka howlaha aannu kaga falcelinayno abaaraha degaanka naafeeyay."[50] Waxa ay u muuqataa in doorashadii tijaabada ahayd wax ku kordhisay hannaanka maamul-daadajinta, iyada oo dadweynaha siisay fursad ay ku doortaan xubnahooda golaha deegaanka, balse may keenin dakhligii dhaqaale ee laga rejaynayay. Muwaadiniinta codkoodu waa in uu u jaro adeegyada aasaasiga ah. Haddii taas la waayo, sida uu sheegay duqa degmada Qardho, waxa ay keenaysaa in ay sii nusqaanto rejadii iyo xamaasaddii dadwaynuhu ka dhaxleen doorashooyinkii tijaabada ahaa, waxaana laga yaabaa in ay ka niyad-jabaan geeddi-galinta iyo dhamaystirka doorashada 37-ka degmo ee harsan, taas oo Puntland ku nagaynaysa xaaladdii hore ee kumeelgaarka ahayd.[51]

Inkasta oo aanay xaqiiqada dhaqaale ee Puntland ahayn mid la jaanqaadi karta rejada shacabka, haddana doorashadii Qardho, Eyl iyo Ufayn waxa ay kor u qaadday baahida mashaariicda horumarineed. Dadweynaha, waxa ay golayaashii ay doorteen uga dhigan yihiin, waxa uu qof xildhibaannada ka mid ahi ku tilmaamay, "matalaad dhab ah".[52] Tani waxa ay keenaysaa in aannu ku hadalno magaca codbixiyayaasha, aniga oo "dawlad goboleedka Puntland iyo deeqbixiyayaasha u waydiinayna kaalmo. Mid ka mid ah xildhibaannada ayaa yiri "in aannu u tagno madaxweynaha oo aannu kala hadalno dhibaatada iyo filashada dadka; hadda ayay tahay masuuliyaddayada siyaasadeed".[53]

---

50. HIPS interview, 2022.
51. HIPS interview, 2022.
52. HIPS Interview, 2022
53. Crawford, G., and Hartmann, C. (2008). Decentralisation in Africa: A pathway out of poverty and conflict. Amsterdam University Press.

> *Marka laga yimaaddo caqabadihii badnaa ee haystay doorashadii dowladaha hoose ee tijaabada ahaa, doorashadu waxa ay qaadday laba imtixaan oo is-huwan:*

In la iska indhatiro baahiyaha codbixiyayaasha, waxa ay keeni kartaa cawaaqib xumo daran. Haddii uu sii socdo dayaca ka jira degmooyinka fogfog, waxa laga yaabaa in ay mustaqbalka fog ku yeelato saamayn taban oo ay keento jahawareer cusub oo shacbiga kaga yimaadda jihada hannaanka dimuqraadiyadda, taas oo haddii aan laga hortagin horseedi karta dib-u-dhac baahsan. Haddaba, Puntland, ka maamul ahaan waxa ay u baahan tahay tab iyo xeelad ay kaga jawaabto iswaafajinta rejada sare ee shacabku ka qabaan horumarka iyo dhaqaale-xumada ba'an ee jirta. Marka laga yimaaddo caqabadihii badnaa ee haystay doorashadii dowladaha hoose ee tijaabada ahaa, doorashadu waxa ay qaadday laba imtixaan oo is-huwan: waa muujinta rabitaan siyaasadeed oo lagaga gudbi karo hannaankii doorashooyinka soo jireenka ah iyo sida loogu guuri karo doorasho ku timaadda heshiis bulsho.

10. Gunaanadka

Maaddaama ay Puntland tahay dawlad-goboleedkii ugu horreeyay maamullada federaalka, lana aasaasay 1998-kii, marnaba Puntland ma laha hindise aan ka ahayn in ay sii waddo doorkeeda dimuqraadiyaynta. Waa in aanay dib ugu soo noqon doorashooyinkii isku dhaca iyo musuq-maasuqa badnaa. Tan iyo markii ay Soomaaliya ka bilaabmeen dagaalladii sokeeye, Puntland waxa ay ku sifaysnayd goob nabadeed. Odoyaasha dhaqanka ayaa door dhexdhexaadineed ku lahaa ilaalinta nidaamka dowladda. Xiriirka dhow ee ay odayaashu la leeyihiin haldoorka siyaasadda, ayaa u suurogaliyay in ay ilaaliyaan nabadgalyada Puntland; iyaga oo u dhaqmaya sidii oo ay yihiin guddi doorasho oo kaligood ka jirta Puntland, isla markaana soo xulayay 66-ka xubnood ee baarlamaanka gobolka. Haddaba, xaaladdan oo kale ayaa hadhaysay doorashadii ugu horreysay ee golaha deegaanka, taas oo hadda laga joogo muddo ka badan 50 sano, doorashadaas oo iyada lafteedu ahayd tijaabo la rabay in lagaga gudbo hannaankii dhaqanka ahaa, oo loo guuro doorasho qof iyo cod ah. Doorshada tooska ah oo qayb ka ahayd ballan-qaadyadii ololaha madaxweynaha hadda talada haya, Siciid Deni, ayaa ka dhacday saddex degmo oo kala ah Ufayn, Qardho iyo Eyl.

Mashruucii tijaabada doorashadu waxa uu abuuray raynrayn siyaasadeed iyo xamaasad dadweyne, isaga oo soo kordhiyay heer maamul-daadejineed, dib-u-heshiisiin bulsho iyo isfahan siyaasadeed-ugu yaraan saddexdii degmo ee doorashada tooska ahi ka dhacday, waana markii ugu horreysay muddo ka badan 50 sano, oo sidan oo kale dhacdo. Si kastaba ha ahaatee, doorashadii tijaabada ahayd waxa ay kor u qaadday rejada dadweyaha, waxaanay kordhisay baahida loo qabo ka qaybgalka siyaasadda iyo bixinta adeegyada aasaasiga ah; kuwaas oo fulintoodu ku adkaan doonto xildhibaannada cusub ee la soo doortay.

> *Marka loo eego, aragtida geeddi-socodka dimuqraadiyeynta, Puntland waxa ay u baahan tahay in ay hesho dheellitirnaan, ka hor inta aanay si buuxda ugu tallaabsan doorasho qof iyo cod ah*

Marka loo eego, aragtida geeddi-socodka dimuqraadiyeynta, Puntland waxa ay u baahan tahay in ay hesho dheellitirnaan, ka hor inta aanay si buuxda ugu tallaabsan doorasho qof iyo cod ah, taas oo rejooyinka bulshada kor u qaadday, culaysna ku noqotay xaqiiqada dhaqaale ee dalka ka jirta. Doorashada qofka iyo codka ahi, dabiib u noqonmayso dhammaan cudurrada siyaasadeed iyo kuwa dhaqan-dhaqaale ee Puntland. Inkasta oo aanay doorashada xorta iyo xalaasha ahi bulshada ka saaraynin culayska qabyaaladda iyo qaraabo-kiilka, haddana waxa ay abuuraysaa rejooyin aan hal-xidhaalahooda asi fudu loo furi, kuwaas oo haddii lagu degdego keeni kara dib-u-dhac dhinacyo badan leh oo ay ka mid tahay in muwaadiniinta shaki ka galo hannaanka dimuqraadiyadda. Tani waxa ay u baahan tahay in hoosta laga xarriiqo, maadaama Puntland u dhaqaaqday sidii loo heli lahaa dowlad dimoqraaddi ah, xumaan iyo samaanba.

11. Talabixinno siyaasadeed

1. **Is-afgarad siyaasadeed:** Caddaymo badan ayaa muujinaya in is-afgaradka siyaasadeed uu ahaa qodobka ugu muhiimsan ee suuragelinaya in Puntland ay ku guulaysato doorashooyinkii tijaabada ahaa ee ka dhacay Eyl, Qardho iyo Ufeyn. Haddii aan la isku raacsanayn siyaasadda, waxa ay u badan tahay in hawsha la carqaladeeyo. Si loo dhammaystiro doorashada deegaanka, waa in wasiir Cabdi Faarax Siciid "Juxa" iyo madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni, gole keenaan mucaaradka iyo jilayaasha kale ee muhiimka ah, halkaana lagu gaaro heshiis wada ogol ah.

2. **Daahfurnaan:** Mid ka mid ah sababaha ugu weyn ee ay u guulaysatay doorashadii Eyl, Ufayn iyo Qardho, ayaa ah in guddida doorashooyinku si daahfuran u qabteen doorashada. Daahfurnaantu, waxa ay yaraysaa khilaafka siyaasadeed ee doorashada ka dhasha iyo kala fogaanshaha bulshada. Sidaa darteed, waa in guddida doorashadu ilaalisaa dhexdhexaadnimadeeda iyo hufnaanta shaqadeeda.

3. **Astaamaha Xisbiyada:** Doorashooyinku waxa ay daaha ka faydeen heerka wax akhris la'aanta codbixiyayaasha. Xisbiyada siyaasaddu waa in ay qaataan calaamado ay si fudud u fahmi karaan dadka aan waxna qorin waxna akhriyin, si ay ugu aqoonsadaan wakiillada xisbiga ay rabaan.

4. **Wacyigelinta dadweynaha iyo codbixiyayaasha:** Inkasta oo guddida doorashooyinka iyo ururrada bulshada rayidka ahi horumar samaynayeen, haddana waa in la kordhiyaa wacyigalinta codbixiyayaasha, gaar ahaan habka diiwaangelinta, dhammaystirka waraaqaha codbixinta iyo barista calaamadaha xisbiyada siyaasadda.

5. **Rejada dadweynaha**: Doorashadii tijaabada ahayd ee ka dhacday Eyl, Ufayn iyo Qardho, waxa ay dadweynaha ku abuurtay rejooyin aad u waa weyn oo ay ka mid yihiin helista adeegyada aasaasiga ah iyo mashaariicda horumarka.

Hadaba, haddii taas la iska indhatiro, waxaa laga yaabaa in ay dadweynuhu ka niyad jabaan danaynta geeddi-socodka doorashada, waxaana lagama maarmaan ah in la isu-dheellitiro xaqiiqada dhaqaale ee Puntland, kobocyaraanta jirta iyo baahida adeegyada bulshada. Dowladda Puntland iyo beesha caalamkuba waa in ay dhiirrigeliyaan geeddi-socodka dimuqraadiyadda, iyada oo mashaariic horumarineed loo qoondaynayo magaalooyinkii doorashadu sida wanaagsan uga dhacday.

6. **Isticmaalka liisaska xiran:** Saami-qaybsiga matalaadda ayaa kor u qaadday wakiillada dadka laga tirada badan yahay iyo haweenka. Sidaa darteed, waa in Puntland doorashooyinka mustaqbalka ku sii joogtaysaa qaabkan. Sida oo kale, waxa ay tani cashar u noqon kartaa dalka intiisa kale.

7. **Musharrax ku caddaynta liiska xiran:** Degmada Eyl oo uu ku guulaystay xisbiga talada haya ee KAAH, ma cadda tirada musharraxiinta ee u taagan xilka duqa magaalada. Arintan ayaa keentay jaahwareer, khilaaf hoose oo siyaasad salka ku haya iyo dib-u-dhac ku yimid dhismaha golaha deegaanka, iyada oo laba musharrax isku khilaafeen cidda u sharraxan jagada maayarka ee xisbiga. Madmadowga noocaan oo kale ah ee ka dhashay liiska xiran waa in laga fogaadaa. Xisbi siyaasadeed kastaa waa in aanu ballan u qaadin musharraxiin badan oo isku kursi ah.

8. Waa in ay dowladdu ka fogaato wax kasta oo madmadow iyo jaahwareer galin kara habsami-socodka doorashada, sida wax-isdabamarinta iyo xakamaynta guddida doorashooyinka. Sida oo kale waa in deeq-bixiyayaashu u dhiirrigeliyaan doorashada Puntland, hab dhaqaale iyo hab farsamo-labadaba, waana in ay ka caawiyaan hufnaanta iyo xalaal-miiradnimada habsami-socodka doorashada.

9. Cabashooyinka ay qabaan mucaaradku, oo ah kuwo abaabulan, ayaa ah in xukuumadda hadda jirtaa joojiso dadaallada ay ku doonayso in lagu dhammeystiro doorashooyinka deegaanka degmooyinka ka harsan Puntland. Inkasta oo mur iyo deebaaq laga leefay doorashooyinkii dadbanaa ee faderaalka, halkaas oo ay dhammaan gobolladu ku tagrifaleen hannaankii loo maray doorashooyinka, haddana qorshaha ay Puntland ku rabto in ay soo afjaro doorashada dadban, una guurto doorasho toos ah, ayaa ah rejo dhalatay. Sida oo kale waa in hannaankan dimuqraadiyadeed oo ah mid la taaban karo la maalgaliyaa. Sida oo kale waa in uu Madaxweyne Deni la kulmo mucaaradka, gaar ahaan ururradii isdiiwaangaliyay, kuwaas oo u xuubsiibanaya xisbiyada siyaasadda gobolka.

10. Sannad, waa muddo ku filan in la qorsheeyo, laguna qabto doorasho heer deegaan iyo heer gobolba ah, gaar ahaan gobol Puntland oo kale ah. Gobolka waxa u qabsoomay wax badan oo ka mid ah hawlaha aasaaska u ah diyaargarawga doorashooyinka. Waxa kale oo uu dhisay, isla markaana hawlgelisay kaabayaal doorashada muhiim u ah, sida guddida komishinka doorashooyinka iyo xisbiyada siyaasadda. Madaxweyne Deni waa in uu garwaaqsadaa in uu u baahan yahay ururro siyaasadeed oo muhiim ah iyo in ay ururradaasi ka qaybgalaan dhammaystirka doorashada deegaanka ee 2023.

HERITAGE

INSTITUTE